

SIDA LOOGA QAADO MUUNADO SAXARADA SI LOOGA BAADHO DHIIG (FAECAL OCCULT BLOOD COLLECTION)

Waxa aanu kaaga baahanahay

Waxa aanu u baahanahay saddex muunadood oo saxaro oo saxaro kala duwan ah oo isku dhawdhaw intii suurogal ah.

Sida aad ugu diyaargarobayso baadhistaada

- Sida fiican cun cunto gasku ku badan yahay laba maalmood kahor iyo inta lagu jiro wakhtiga ururinta. Cuntooyinka gasku ku badan yahay wax kamid ah siiriyaalka baraan, biinis, roodhida badarka ka samaysan, lawska iyo siidhka, midhaha darayga ah iyo kuwa la qallajiyey.
- Ha cunin hilibka cas ama solan laba maalmood kahor iyo inta lagu jiro wakhtiga ururinta.
- Waa inaad ka dheeraato horseradish, red radish, cauliflower, broccoli, turnip, parsnip iyo rockmelon laba maalmood kahor iyo inta lagu jiro wakhtiga ururinta. Waxa kujira insaym la dhaho peroxidise, oo wax u dhimi kara baadhista.
- Fiitamiin C badan (>250mg) – oo sidoo kale la dhaho Ascorbin acid – wuxuu keeni karaa natiijooyin badan oo been ah markaa inaan la cunin 48 saac kahor bixinta muunadda koowaad, iyo inta lagu jiro wakhtiga ururinta.
- Ku dadaal cadaayga ilkahaagu inaanu keenin cirridka oo dhiiga.
- Fadlan raac wixii tilmaamo kaaga yimaada dhakhtarkaaga haddii lagugula taliyey inaad ka dheeraato alkahoolka, asbiriinka iyo daawooyinka kale ee xanuunka loo cuno. Kuwani waxay keeni karaan dhiigis dheefmareenka ah ama waxay keeni karan natiijo togan.

SIDA LOOGA QAADO MUUNADO SAXARADA SI LOOGA BAADHO DHIIG (FAECAL OCCULT BLOOD COLLECTION)

Sida loo qaado muunadda saxarada

1. Ka soo qaado weel dhakhtarkaaga ama qolalka Wellington SCL ee kuugu dhaw.
2. Dhig weel isgiriim oo nadiif ah ama wax la mid ah musqusha ama ka samee xarqadda musqusha saxanka dhextaala shiraac.
3. Hubi in kaadi ama biyo aanay ku dhex darsamin saxarada.
4. Isticmaal qaadada ku lifaaqan furka weelka kuna rid qaadooyin buuxa oo saxaro ah oo aad dusha ka soo qaaday ilaa weelku kala-badh joogsado.
5. Si adag daboolka ugu xidh kuna calaamadi weelka magacaaga, taariikhda dhalasho iyo taariikhda iyo wakhtiga ururinta.
6. Dhig muunadda iyo foomka codsiga ee dhakhtarkaaga ka yimi bacda wax lagu rito.
7. U qaad muunadda dhakhtarkaaga ama qolalka Wellington SCL.

Ogow: Muunaddu waxa dhici karta in lagu hayo tallaagad habeenka oo dhan.

**Fadlan kala xidhiidh shaybaadhka wayn wixii macluumaad dheeraad ah
(04) 381 5900**